



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Juun 16, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Fiidiyowga Xirfadlaha Taageerada Tooska ah oo La bilaabay

Qof kasta oo ka tirsan naafanimada maskaxda/korriinku wuu ka warqabaa dhibaatooyinka dhanka shaqaalaha iyo yaraanshaha shaqaaleysiinta ee soo wajahaysa hay'adaha daryeelka bixiya ee guud ahaan Oregon. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ayaa sii wada in uu ka shaqeeyo sidii loo heli lahaa xalal iyo ilo hal abuur leh, oo ay ku jiraan maalgelintii hal mar ee sii haysashada shaqada ee dhawaan la siisay hay'adaha daryeelka bixiya.

[Fiidiyow xayeysiis ah](#) oo cusub ayaa la bilaabay oo ku jira [website-ka shaqada ee Impact Oregon](#) oo tilmaamaya shaqada muhiimka ah ee xirfadlayaasha taageerada tooska ah. Iyada oo la adeegsanayo DSP dhab ah si ay u sheegaan sheekooyinkooda, fiidiyowgani wuxuu dadka la wadaagayaa sababta “why,” – sababta dadka qabta shaqada daryeelka tooska ahi u jecel yihiin waxa ay qabtaan. Fiidiyowga waxaa la socda qoraal ‘captioned’ ku qoran Ingiriisi iyo Isbaanish. Fadlan fiidiyowgan cusub ee DSP si weyn dadka ula wadaag oo soo geli barahaaga warbaahinta bulshada iyo website-yada: <https://youtu.be/WT3tcbbreLg>

Tani waa mid ka mid ah ilaha badan ee ku lugta leh ololaha Impact Oregon, oo ay ku jiraan [qalabka dhanka internet-ka](#) iyo [fiidiyow xayeysiis ah oo guud](#).

Waxaan u baahanahay caawimaadaada si loo sii gudbiyo hadalka! ODDS waxay codsanaysaa in hay'adaha maamulka kiiska iyo daneenayaashu [ay](#)

[fiidiyowga kula wadaagaan](#) nidaamyadiina warbaahinta bulshada iyo website-yadiina.

Waad ku mahadsan tihiin taageeradiina iyo dadaaladiina.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.